

## WARBIXIN

## Tallaalka kahortagga HPV

Kowdii bishii jannaayo ee 2010 waxaa la hirgeliyey barnaamijka carruurta looga tallaalayo cudurka HPV, oo ah cudur wata astaamo finan nabaro reeba. HPV waxay u taagan tahay humant papillomvirus – oo ah fiirus isbeddel u keena ilmagaaleenka, kaas oo haddii uu raago keeni kara kansar ku dhaca ilmagaaleenka. Tallaalka kahortagga HPV wuxuu boqolkii 70 difaacayaa kansarka ilmagaaleenka ku dhaca. Haddii yaraanta la isku tallaalo oo kadibna la baaritaanka la isugu yeero, wuxuu qofku yeelanayaa difaac wanaagsan oo ka ilaaliya kansarka ilmagaaleenka.

**Gabdhaha dhashay 2002 ama kadib waxaa loogu deeqayaa tallaalka lagu sameeyo marka ay dhigayaan fasalada 5aad iyo 6aad. Si natiijo wanaagsan looga gaaro waxaa la tallaalayaa laba goor oo ay u dhexeyso ugu yaraan lix bilood, ugu badnaanna 12 bilood.** Tallaalku waa ikhtiyaar ah. Foomkaan waxaa nagu wargelineysaa haddii ilmahaaga la tallaalayo ama haddii kale adigoo xariiqaya khaanadda ku habboon. Haddii aan lagaa helin wax oggolaansho waxaa loo fasiranayaa in aan ilmahaaga lagaa tallaali karin.

Warbixinaha tallaalka HPV waxaa la soo diiwaangelinayey laga soo bilaabo kowdii jannaayo 2013 si loo sii hagaajiyo. Warbixinaha la soo ururiyo waa sir sida ku qoran sharciga qarinta iyo soobandhigidda macluumaadka dadweynaha (2009:400). Haddaba si loo sii hagaajiyo barnaamijka tallaalka cudurka HPV waxaa loo baahan yahay in lala kaashado diiwaanada kale laamaha caafimaadka iyo baaritaanka shaybaar oo dhacaanada kaydsan oo laga baarayo HPV.

Caddayn ayaa laga bixinayaa labada baaritaanba. Tallaalka awgiis waxaan kaa baryeynaa in aad ka jawaabto su'aalaha ku qoran caddaynta caafimaadka oo hoos ku qoran. Nagu soo wargeli haddii xaaladdu isbeddesho inta u dhexeysa labada tallaa. Haddii aad dooneyso warbixin dheeraad ama aad su'aalo qabto, waxaad kala xiriiresaa kalkaaliyaha caafimaadka ama dhakhtarka ka hawlgala dugsiga ilmahaagu dhigto.

-----  
Tallaalka kahortagga HPV      Oo loo dhiibayo kalkaaliyaha caafimaadka dugsiga ugu dambayn

-----  
Magaca gabadha

Lambarka aqoonsiga

Fasalka

Haa, waxaan oggolahay in ilmahaaga la tallaalo

Maya, ma doonayo in ilmahaaga la tallaalo

***Caddaynta caafimaadka (uma baahnid inaad ka jawaabto haddaad ku jawaabtay tallaalka maya)***

Cunuggaagu

- ma qabaa xasaasiyad ama aleerjiyo? .....  Haa     Maya  
– ma helay xasaasiyad halis ah mar hore oo la tallaalayey? .....  Haa     Maya  
– ma qabaa cudur halis ah oo joogto ah? .....  Haa     Maya

*Haddaad haa ku jawaabto, waxaad warbixin dhammaystir ah ku qoreysaa baalka dambe.*

Saxiix Degaanka:

Taariikh:

